**3/18/2013**

# Geedi Socodka Kambaala

## Qabyo qoraal ku saabsan Istaraatiijiyada Baddaha Soomaaliyeed-Baaqa Number Labo (2)

1. Xubno ka socdey Guddiga la Xiriirka Arimaha Soomaaliyeed ee qaabilsan ka hortaga burcad badeedda (waa geedi socodkii Kambaala) kana kooban Dowladda Federaalka Soomaaliyeed, Puntland, Galmudug iyo Somaliland ayaa ku kulmay Addis Ababa intii u dhaxeysay 16-18 Maarso 2013, si ay u soo diyaariyaan, Ayaga oo iskaashanaya, Qorshe wax looga bedelayo sharcigga baddaha si wax loo qabto looguna kaabo Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee Badda Soomaaliyeed. Shirka waxaa marti geliyey UNPOS, UNODC, IMO, FOA oo ay taageerayaan xafiiska lagu magacaabo (Oceans Beyond Piracy – badaha ka shisheeya goobaha Burcad Badeedda iyo EU CAP NESTOR).
2. Sidii aan samaynay markii aan qoraynay Qorshihii Istaraatiijiyadda ee Badda Soomaaliyeed, ugu horeynba waxaanu ku heshiinay in aan arrimaha uga wada hadalno si heer farsamo ah isla markaasna aan meel iska dhigno arrimaha siyaasadda. Waxaan u howl galney sidii ay shirka uga soo bixi lahaayeen arimo la taaban karo una dhisi laheyn qorshe hawleed ku fadhiya xaqiiqda jirta ee wax ka qabanaayo arrimaha sharciga ee waafaqsan habka lagu hor u marinaayo laguna hirgalinaayo istraatiijiyada arrimaha badda Soomaaliyeed.

3. Kadiba markaanu yeelanay hadal balaadhan iyo dood tafaasiili ku dheehan tahay, waxaanu ku heshiinay saansaabka qorshe-sharciyeed maadaama aanu kamid nahay guddiga diyaariya qabyo-qoraalka istaraatiijiyada baddaha Soomaaliyeed. Waxaanu ku heshiinay in arrimaha qorshahayaga sharci inuu si dhakhso leh wax uga qabto saddexda arrimood ee soo socda: Baaxadda dhulka, khayraadka badda gaaar ahaan arrimaha kaluumaysiga khuseeya, ciidamada xeebaha (coast guard/maritime police) iyo awoodahoodaba.

4. Qorshe hawleedkan sharci ee lagu taageeraayo qabyo qoraalkii arrimaha istaraatiijiyada badda Soomaaliyeed iyo talo soo jeedintayadii bilowga ahayd kuna qotantay hadafka aanu leenahay, dhammaantood waa arrin ka wada timid dadka Soomaaliyeed kuna qotanta maslaxadooda. Waxaan ugu baaqaynaa bulshada caalamka inay nagu taageerto howsha aanu wadno sidoo kalena waxaanu ka codsanaynaa bulshada caalamka inay marwalba ku hawlanaato habkii Soomaalida looga kaalmayn lahaa samaynta xal sharciyeed kaasoo ka turjumaaya dareenka dadka Soomaaliyeed ahaan doonana mid la joogtayn karo.

## Baaxadda sharci ahaan ay tahay in wax laga qabto (jurisdiction)

5. Shuruuc fara badan oo la xidhiidha arrimaha badda Soomaaliyeed ayaa xidhiidh la leh sharciga baddaha ee soo baxay 1982dii. Shaki ayaa ka jira ficilkii ka dhashay iyo halkii uu ku danbeeyay digreetadii madaxwayne ee tirsigeedu ahaa 14 soona baxday 09/02/1989 iyo sharcigii ka horeeyay ee soo baxay 1972dii. Walina ma sugna in sharcigii arrimaha baddaha Soomaaliyeed ee soo baxay 1988dii uu dhaqan galyahay iyo in kale. Hase ahaatee waxaanu go'aansanay arrimahan soo socda:

    a. In 1989kii ay Soomaaliya saxiixday sharcigii badaha ee soo baxay 1982dii;

    b. In sharcigii qabyo qoraalka ahaa ee la soo saaray 1988dii uu waafaqsan yahay sida aanu wax u aragno sidoo kalena sharcigaasi wuxuu muujinaayay inay Soomaaliya saxiixday kadibna ansixisay sharicga badaha ee soo baxay 1982dii kaasoo waafajinaayay sharciga baddaha.

    c. In isla sharcigaa aan kor ku soo sheegnay uu ku soo baxay faafinta rasmiga ah ee dowlada Soomaaliyeed sannaddii 1989kii (eeg boggaga 85 iyo 95) oo xaqiijinaaya in sharciga badda ee soo baxay 1982dii uu ka hirgalay Soomaaliya maalintii lagu qoray faafinta rasmiga ah.

6. Waxaanu rajaynaynaa in baarlaamaanadayadu ay nala xaqiijin doonaan sida ay ku sugan tahay xaalada shuruucdii aanu soo sheegnay. Hase ahaatee, maadaama ay hadda jirto cadayn (sharci) ku saabsan arrimaha badda Soomaaliyeed, waxaan ugu baaqaynaa maraakiibta ajinabiga ahi, sida ay qabaan qaraarada golaha ammaanku inay gacan ka gaystaan badbaadinta badahanaga.

7. Waxa kaleeto oo aanu go'aansanay, ka guddi khubaro ahaan, inaanu hawshayada horay u dhigno dhinaca arrimo badan oo sharciga khuseeya. Waxaanu go'aansanay inaanu iskaashi ka muujino habka qeexitaanka halka ay ku eegtahay soohdinta baddayadu. Waxaanu u hawl galaynaa inaanu xaqiijino sidii ciidamayada badda, maxkamadaha iyo booliiska xeebaha ilaaliya ay si dhab ah uga mid noqon lahaayeen hay'adaha hir galiya sharciga isla markaana isbadal u keeni lahaa.

## Khayraadka, gaar ahaan kalluumaysiga

8. Hirgalinta arrimaha sharciga ee kalluumaysiga waxay qayb ka tahay habka maamulka guud ee kalluumaysiga. Waxaan garwaaqsannahay in habka sharci iyo hay'ad ahaan loo maamulo arrimaha kalluumaysiga ay u baahan yihiin in la xoojiyo, laguna xoojiyo maamul wanaaga iyo arrimaha waajibka nagu ah lagana so dheegtay shuruucda caalamiga ah. Waxaanu leenahay arrimo badan oo maamul oo khuseeya qaabka kala sareeya ee loo maamulaayo (kalluumaysiga) iyo shuruuc la xidhiidhtaba, laakiin waxaanu u baahannahay inaanu casriyayno wixii hadda jira buuxinnana waxyaabaha naga dhiman.. Waxaanu u baahan nahay inay bulshada caalamku naga taageerto habkani.

9. Waxaanu ka codsanaynaa bulshada caalamka inay naga taageerto habkii aanu u xoojin lahayn hay'adaha maamul ee jira iyo awoodii aanu ku soo ururin lahayn xogta ku saabsan kalluunka iyo noocyadiisaba, sidoo kalena aanu ka horumarino dhinaca xeebaha arrimaha kaabaaya ka faa'iidaysiga kalluumaysiga si aan markaasi u qaadano qorshe iyo go'aan maamul lagu horumarinaayo kalluumaysiga.

10. Waxaa udub dhexaad u ah horumarka aanu doonayno inaanu hiigsano, horumarinta awooda sharci iyo waxqabad ee ay u hawl galayaan ciidamadanada ilaalada xeebaha. Waxaanu u hawl galaynaa sidii iskaashi iyo wada xiriir u dhexmari lahaa ciidamada badda amma ilaalada badda iyo kalluumaysatadanada iyo habka maamul ee loo samaynaayo khayraadka badda taasoo ay kamid tahay maraakiibta kalluumaysatada oo la saaro sarkaal baara kalluunka la dabto amma ilaaliya marka kalluumaysigu socdo.

## Ururada booliiska, ilaalada xeebaha iyo awoodahoodaba

11. Waxaanu garwaaqsannahay in helitaanka awood si dhab ah lagu hirgaliyo sharciga khuseeya arrimaha badda kuna salaysan sharci adag oo uu udub dhexaad u yahay istaraariijiyada arrimaha badda Soomaaliyeed. Si loo badbaadiyo loona kormeero barri-biyoodka Soomaaliyeed. Waxaanu u baahannahay inaanu horumarino awooda sharci ee shuruucda hay'adaha hirgalinaaya arrimaha maamulka badda ee ka jira dhinaca dawlada fedaraalka, Somaliland, Puntland sidoo kalena aan u suubino isla hay'adahan oo kaleeto maamulka Galmudug si loo helo hay'ad cusub oo hirgalinaysa shuruucda badda.

12. Waxaanu u hawl galaynaa sidii lagu heli lahaa door muuqda, mandaado amma waajibaad shaqo, hab is xukun iyo inaan u suubino ururo hay'adaha hirgalinaaya shuruucdanada kala gedisan. Talaabada ugu horaysa ee aynu qaadayno ee waafaqsan arrinta aan soo sheegnay waxay tahay sidii aan ku soo gabagabayn lahayn tirada shuruucda kala gedisan ee hadda lagu dhaqmayo labadaba bilood ee hadda soo socda. Annagoo fiirinayna maslaxada caamka, hadba meeshii ay suurtagal ka tahay, sida shuruucda lawada wadaago, waxaan u hawl galaynaa sidii lagu heli lahaa inuu iskaashi iyo wada shaqayn u dhex maro hay'adaha aanu so sheegnay. Sidoo kaleetana xukun u wadaagaan hay'adaha kale ee wadaniga ah iyo bulshada caalamkaba. Waxaan u hawl galaynaa sidii arrintani u noqon lahayd udub dhexaadka istaraatiijiyada arrimaha badda Soomaaliyeed.

## Talaabada Tan Xigta

13. Waxaanu go'aansanay inaanu kulano mar labaad muddo laba bilood gudahood ah si aanu dib u eegis ugu suubino wixii horumar ah ee baarlamaanadanada ay ka gaaraan arrimaha sharci ee baddaha iyo inaan sii horumarino qorshahanaga sharci maadaama aanu ka mid nahay qaybta wax ka qorta qorshaha qabyo qoraalka ee istaraatiijiyada baddaha Soomaaliyeed. Waxaan waydiinsanaynaa UNPOS, IMO iyo UNODC inay sii wadaan kaalmada ay nasiinayaan sida samaynta xoghayn iyo inay hogaamiyaan isku xirida arrimahan iyagoo raacaya mar walba geedi socodkii Kambaala.

Addis Ababa, 18 Maarso 2013